


# CCS ELEVATE

## FAIRWOOD ELEMENTARY

Bishii Noofeembar 2023, waxaa mahad leh iyada oo ay ugu wacan tahay taageerada baaxadda leh ee codbixiyaasha Columbus, Dugsiyada Magaalada Columbus waxa ay meel mariyeen \$100-milyan oo canshuur ah oo ay ku ballan qaadeen in ay kor ugu qaadayaan xarumahooda ayna yarey-nayaan raad-raad-raacooda. Hadafka waa in la taageero hiigsiga degmada ee ah bixinta waxbarasho tayo sare leh ee dhammaan ardayda. Siyaasadda Guddiga (Per Board Policy) 7105, Kormeeraha Guud wuxuu abuuray Guddi Hawleedka Xarumaha Bulshada horaantii Febraayo 2024 si ay u qiimeeyaan dib-u-habeeynta xarumaha degmada. Kooxdan hawshani waxay ka kooban yihiin shakhsiyaad leh asal iyo waayo-aragnimo kala duwan.



Guddi-hawleedku waxay u soo jeediyeen talooyinka ugu horreeya ee Guddida Waxbarashada Talaadadii 7-da Maajo. Talooyinku waxay diiradda saareen waxay jaan-goyn doontaa kooxaha muusikada ee dhismayaasha, kor-dhinta galaan-galka tacliimeed iyo wax-qabadyada manhajka ka baxsan, bixinta adeegyo loo siman yahay ee qoysaska iyo ardaydaba, iyo xur-maynta maal-galinta cashuur bixiyeyaashii hore. Hadafka ayaa ah in si wanaagsan loo fahmo aragtida bulshada ee talooyinka bilowga ah iyo kor u-qaadida wadashaqeynta iyada oo loo marayo wada hadal furan. Tani waxay gacan ka geysan doontaa in la waafajiyo qorshaha guud ee xarumaha iyo hiigsiga degmada iyo kor u-qaadida fahanka Dugsiyada Magaalada Columbus.



Kooxda Hawl-wadeenada Xarumaha Bulshada ee Kormeeraha Guud waxa ay ku talinayaan in Guddida Waxbarashadu xiro **Dugsiga Hoose ee Fairwood Elementary School**, kaas oo hadda noqon doona qayb ka mid ah bulshooyinka Dugsiga Hoose ee Livingston Elementary School iyo Dugsiga hoose ee Ohio Avenue Elementary school.

**Dugsiga Hoose ee Fairwood Elementary School (1924)** wuxuu u adeegi karaa 475 arday; si kastaba ha ahaatee, laga bilaabo sanad-dugsiyeedka 2023-2024, 215 arday oo kaliya ayaa iska diiwaan-galisay, iyada oo heerka adeegsiga hadda yahay 46%.

Dugsiga Fairwood wuxuu ku yaalla bariga magaalada ee east downtown-ka. Intii lagu guda jiray Shaqada Qorshaha Guud ee Xarumaha, Ohio Avenue iyo Livingston labaduba waxay heleen cusboonaysiinta dhismaha qarniga 21-aad. Ka soo guurista ardayda Fairwood una soo rarista labadan dugsi waxay jaan-goyn doontaa kooxaha muusikada fasallada dugsi

hoose (PreK-ilaa 5-aad) iyo ardayda dugsi dhexe (6-ilaa 8-aad). Ardayda fasalka lixaad waxay u gudbi doonaan koonfurta (South) fasallada 6-ilaa12-aad, iyaga oo siinaya waayo-aragnimo dugsi dhexe oo caadi ah iyo wakhti waxbarasho oo dheeraad ah.